

EBT-ga Cudurka Safmarka ee Sannad Dugsiyeedka 2020-21 ayaa dhowaan imaanaya!

Waa maxay dheefaha EBT ama P-EBT ee Cudurka Safmarka ah?

Iyada oo sabab u ah COVID-19, ayaa carruurta xaqa u leh cuntooyinka iskuulka ee bilaashka ah ama qiimahooda la dhimay waxay heli doonaan dheefo cunto oo dheeraad ah. Dheefahan cuntada ayaa waxaa loo yaqaannaa P-EBT.

Dheefaha P-EBT ayaa gacan ka siinaya qoysaska Washington in ay cunto soo iibsadaan marka iskuullada la xiro ama ay ka jiraan imaanshaha qof ahaaneed oo la dhimay.

Kumaa xaqa u leh?

Carruurta waxay xaqa u leeyihiin dheefaha P-EBT haddii:

- Iskuulkooda la xiro ama uu dhimo saacadaha imaanshaha qof ahaaneed.
- Waxay xaqa u leeyihiin cuntooyinka iskuulka oo bilaash ah ama qiimahooda la dhimay.

Sidee ayay qoysasku u codsadaan?

Warar wanaagsan: Qoysaska looma baahna in ay codsadaan Barnaamijka P-EBT! Haddii cunuggaagu uu xaqa u leeyahay cuntooyinka iskuulka oo bilaash ah ama qiimahooda la dhimay, waxaa laga yaabaa in ay si toos ah ugu qalmaan. Qoysasku waa in ay xaqiijiyaan cinwaankooda boostada in uu ku jiro galka yaalla iskuulka cunugga waxaana lagu dhiirrigelinayaa in ay buuxiyaan codsiga cuntada iskuulka haddii cunugooda uusan horay u helin cuntooyin bilaash ah ama qiimahooda la dhimay.

Immisa ayay qoysasku heli doonnaan?

Qaddarada dheefaha ayaa kala duwan waxayna ku xiran tahay qaabka barashada ee iskuulka cunugooda ee bil kasta ee la siiyay. Qaddarka dheefaha ee bilaha ah waxay u dhaxayn doonnaan \$25 ilaa \$123.

Sidee buu u egyahay kaarka P-EBT?

Ka eeg boostada kaar u eg sidan oo kale! Kaarka P-EBT wuu ka duwan yahay wuxuunna beddelayaa kaarka EBT ee cuntada ama kaashka ee (Quest).

WASHINGTON

P-EBT



5077 1012 3456 7890

Cardholder Name

Goormee ayay imaan doonnaan kaararka P-EBT?

Carruurta xaqa u leh waa in ay fishaan in ay ogeysiis helaan dabayaaqada bisha maarso, kaas oo ay ku qornaan doonnaan macluumaad badan. Kaarka P-EBT ayaa si gaar ah boostada loogu soo diri doonaa toddobaadyada ku xiga.

Sidee loo adeegsadaa kaararka P-EBT?

Kaararka P-EBT ayaa waxaa loo adeegsan doonaa sida kaarka amaaahda si cunto loogaga soo iibsado dukaamada raashiinka iyo suuqyada beeralayda ama in cunto looga iibsado dukaamada internet-ka sida Amazon ama Walmart.

Qoysasku ma heli doonnaan kaarka P-EBT oo cusub bil kasta?

Maya, qoysasku waa in ay hayaan kaarka P-EBT ee cunug kasta. Bixinta koowaad waxaa ka mid noqon doonna dheefo loogu talagalay bilowga sannad dugsiyeedka 2020-21 ilaa Jannaayo 2021. Dheefo dheeraad ah ayaa waxaa laga yaabaa in lagu bixiyo kaarka laba bilood kasta ilaa dhammaadka sannad dugsiyeedka ilaa iyo inta ay socoto xaaladda caafimaadka dadweynaha ee cudurka COVID-19.

Booqo dshs.wa.gov/PEBT si aad wax badan u oggaato!

Haddii aad u baahan tahay macluumaadkan oo luuqad kale ku qoran, ka war Xarunta Xiriirka ee P-EBT **833-518-0282**.

Qoysaska waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay ka qaybgalaan cuntooyinka iskuulka ee **Grab-n-Go** xitaa haddii ay haystaan dheefaha P-EBT.

Hay'adan waxay bixisaa fursad loo siman yahay.



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives